

Barnaamijka Kaalmada Dhibanaha/Markhaatiga (The Victim/Witness Assistance Program)

Sideen ula xiriiri karaa barnaamijka?

Barnaamijka Kaalmada Dhibanaha/Markhaatiga Wasaaradda Xeer-ilaalinta Guud ayaa ka bixisa dhamaan 54 ta degmo maxkamadeed. Si aad u hesho xafiiska kuugu dhow, wac **Khadka Taageerada Dhibanaha**

Lacag la'aan 1-888-579-2888 ama Toronto iyo agagaarkeeda 416-314-2447 ama booqo www.ontario.ca/victimservices

Barnaamijka ma sameyn karo in uu:

- helo ama ka hadlo cadeymahaada
- la noqdo dacwad qof lagu soo oogay
- bixiyo ama qabanqaabiyo xanaano caruur
- bixiyo gaadiid lagu tago ama lagaga soo noqdo maxkamadda

Waa Maxay Barnaamijka Dhibanaha/Markhaatiga?

Haddii aad tahay dhibane ama markhaati dambi rabshad leh, waxay u badan tahay in maxkamad aad tegi doonto.

Arrintan oo noqon karta waayoaragnimo dhib iyo jaha-wareer leh. Waxaa dhici karta in aad leedahay su'aalo fara badan oo ku saabsan habka maxkamadda dembiga iyo waxa laga fili doono.

Barnaamijka Kaalmada Dhibanaha/Markhaatiga wuu ku caawinayaa. Iyadoo ku xiran kiiskaaga iyo baahidaada gaarka ah waan kula hadli doonaa waana ku caawini doonaa. Adeegyadeena waxay bilowdaan marka booliiska eey dambi qoka ku soo oogaan weeyna socon doonaan ilaa kiiska maxkamadda uu ka dhamaado.

Yaa kaalmo heli kara?

Adeegyada waxaa loo bixiyaa sida aay u kala muhimad badan yihiin iyadoo lagu saleynayo dhibanayaasha halista ku jira iyo markhaatiyada dambiyada rabshadda leh, sida rabshad qoys, ku xadgudub ilmo, jug jinsiya ah, ku xadgudub waayeel, dil iyo dambiyada naceybka ku saleysan.

Intaa waxaa dheer, waxaan kaalmo siinaa:

- dhibanayaasha leh baahi gaar ah
 - qoysaska ah dhibanayaal dad laga dilay
 - qoysaska ah dhibanayaal dad gaadiid ku dhintay oo keenay in dambi qof lagu soo oogo.
- Warar iyo adeegyo caruurta loogu talagalay oo da'dooda ku haboon ayaa la heli karaa.

Sidee ayaan kaalmo ku heli karaa?

Dambiyada marka qof lagu soo oogo ka dib, booliiska ama xeer-ilaaliyaha Boqortooyada (Crown attorney) ayaa u gudbiya dhibanayaasha iyo markhaatiyada barnaamijka. Haddii aad tahay dhibane dambi rabshad leh, sidoo kale iskaa ayaad u wici kartaa ama qof beesha ka tirsan ayaa kuu wici kara barnaamijka si aad u hesho. Shaqaalaha waxay isku dayi doonaan in aay sida ugu dhaqsiiyaha badan kuula soo xiriiraan si aay kuu siiyaan kaalmo oo wax uga qabtaan wixii welwel ah ee aad qabto oo dhinaca amaanka ah.

Kharash intee la eg ayuu ku kacayaa?

Adeegyada waa lacag la'aan Ontario oo dhan.

Kaalmo nooc ee ah ayaa la heli karaa?

Barnaamijka Kaalmada Dhibanaha/Markhaatiga wuxuu:

- Ka jawaabi karaa su'aalaha ku saabsan habka cadaaladda dambiyada, habka maxkamadda iyo doorkaada maxkamadda
- Kaa caawini karaa in aad fahamto maalin walba oo maxkamad leedahay waxa aad filan doonto iyo in uu kaa caawiyo isu diyaarinta hor-imaashaha maxkamadda
- Ku siinayaa nuqulada warqadaha maxkamadda sida xaaladaha damaanadda iyo amarada tijaabinta
- La xiriiri doonaan iyagoo magacaaga ku hadlaya xeer-ilaaliyaha Boqortooyada ama sarkaalka booliiska kiiskaaga qaabilsan
- Ku siin doonaa kaalmo dhinaca niyad-dhiska ah oo joogto ah inta maxkamadda socoto oo dhan
- Kuu gudbin doonaan hey'ado beeleed wixii adeegyo kale ah, sida la-talin iyo qorsheyn amaan

- Kuu qabanqaabin doonaa turjumaano luqadda kiisaska xadgudub qoyska dhexdiisa ah iyo/ama in aay ku sahlaan wax walba oo baahi gaar ah
- Kaa caawini doonaan in aad fahamto oo aad buuxiso Ooraahda Saameynta Dhibanaha (Victim Impact Statement)

(Somali)